

adiga khaladkaaga ahayn oo aysan jirin wax aad sameyn kartay si aad uga hortagto in uu dhaco.

Dadka badankood, ka dib markay la kulmaan dhacdo adag, waa jawaab dabiici ah inay isku dayaan inay macno u yeelaan waxa dhacay iyo sababta ay u yeeshen uurka ektoobiga. Isku dayga inaad fahanto sababta aad u yeelatay uurka ektoobigu waxay noqon kartaa wax kugu abuura laacwaa maadaama inta badan ay xadidan yihiin ama xitaa aan lahayn jawaabaha su'aalaha.

Qaarkood waxay dareemaan dambi waxayna xitaa isku eedeeyaan inay "sababeen" ama gacan ka geysteen uurka ektoobiga. Waxaa muhiim ah in aad qirto in aysan jirin wax aad sameyn kartay si aad u joojiso dhicitaanka uurka ektoobiga iyo in aadan adigu khaladka lahayn. Maad lahayd ikhtiyaar kale oo aan ahayn in lagaa daaweeyo uurkaaga ektoobiga maxaa yeelay waxay halis gelin lahayd noloshada haddii aan laga daaweyn lahayn.

In ka badan kala badh uurka ektoobiga ee Boqortooyada Midowday(UK), ma jirto khatar la og yahay ama waxyaallo keeni karat uurka ektoobiga.

Dareenka lammaanahaaga

Uurka ektoobigu waxa uu sidoo kale saameeyaa lammaanayaasha. Iyaga oo isku dayaya inay ka baaraandegaan waxa ku dhacay naftooda, waxay isla markaa isku dayi karaan inay ku siiyaan taageero ka dib markay arkaan dhibta jidheed iyo shucuureed ee aad martay.

Lammaanahaaga ayaa laga yaabaa in uurku uusan saamayn. Waxaa laga yaabaa inay isku dayayaan inay wax ka qabtaan falcelintooda shucuureed ee ku aadan uurka lumay markhaatinnna ka noqonaya dhaawaca soo gaadhay jirkaaga iyo dareenkaaga. Dadka qaar, waxaa laga yaabaa in ahmiyadda lamaanuhu adiga uu yahay halkii uu ka ahaan lahaa uurkii lumay taasina waxay noqon kartaa meel la isku afgaran waayo. Mararka qaarkood lammaanahaaga ayaa laga yaabaa inay ku adkaato inuu fahmo dareenkaaga waxaadna u malayn kartaa in lammaanahaagu uusan ku taageerayn sidii aad jeclaan lahayd. Lammaanayaashu waxay isku dayi karaan inay "wax hagaajiyaan" ama waxay rabi karaan inay ka fogaadaan ka hadalka waxa dhacay ama soo hadal qaaditaanka mowduuca xanuunka badan. Sababtu maahan inaysan danaynayn laakiin waxay rabaan inay "wax hagaajiyaan". Iyada oo inta badan ahmiyadda adiga lagu saarayo, waxay sidoo kale dareemi karaan in laga tegey oo la iska indho tiray. Lammaanayaashu sidoo kale waxay la kulmi karaan dhibaatooyin nafsiyeed ka dib uurka ektoobiga sida walbahaarka dhibaataada ka dib.

Waxaa muhiim ah, marka aad dareento inaad awooddo, inaad lammaanahaaga kala hadasho dareenkaaga iyo dareenkooda labadaba. Waxaan sidoo kale halkan u joognaa inaan ka taageerno lammaanayaasha dhibka uurka ektoobiga.

Sidee Hay'adda Uurka

Ektoobigu u bixin kartaa taageero

Hay'adda Uurka Ektoobigu waxay bixisaa macluumaad waxayna taageertaa kuwa waaya uurku marka uu ku jiro marxaladaha ugu horreeya, oo ay qabsato masiibada uurka ektoobigu.

Markay timaaddo Hay'adda Uurka Ektoobiga, in badan oo naga mid ah waxay soo mareen dhaawac jireed iyo mid shucuureed oo uu sababay uurka ektoobigu sidaa darteed waan fahmaynaa oo u damqanaynaa sida adiga iyo kuwa aad jeceshahay dareemaysaan hadda. Waxaa laga yaabaa inaad dareento cidlo, wareer, iyo culays. Waxaa laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan waayo-aragnimada iyo waxa dhici doona, jir ahaan iyo dareen ahaanba. Waxaan halkan u joognaa inaan ku taageerno.

Boggayaga internet-ka waxa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soo kabashada jireed iyo shucuureed kadib uur ektoobiga. Degelka waxa ku jira xog caafimaad oo saxa sidoo kale waxaa ku jira macluumaad ku saabsan

adeegyadayada taageerada kala duwan halkaas oo aad nala wadaagi karto khibradahaaga su'aalana na weydiin karto. Haddii aad u malaynayso inaan ku caawin karno, fadlan booqo degelkeena, iimayl noo soo dir ama na soo wac.

Fadlan booqo ectopic.org.uk si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo taageero.



Somali
Maareynta
Filashada

Expectant Management

The
Ectopic
Pregnancy
Trust



Publication date: November 2021

Website: ectopic.org.uk

Helpline: 020 7733 2653

Email: ept@ectopic.org.uk

Registered charity number:1071811



Registered with
FUNDRAISING
REGULATOR



The
Ectopic
Pregnancy
Trust



For healthcare professionals: To request further leaflets, please contact leaflets@ectopic.org.uk or call 020 7096 1838 or text to 07537 416085



Waan ka xunnahay in xirfadlahaaga daryeelka caafimaad uu kugu wargeliyay inaad leedahay uur ektoobiga.

Waxay noqon kartaa waqti caadifad ahaan iyo jidh ahaanba adag waxaana laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan daaweyntaada iyo waxa kugu dhici doona. Waxaa jira siyaabo kala duwan oo uur ektoobiga loo daaweyn karo marka, waxa aan waraaqdan kaga hadli doonaa oo kaliya su'aalo la xidhiidha **ku daawaynta uur ektoobiga** hab sugitaana.

Waxaad macluumaad dheeraad ah iyo taageero ka heli kartaa halkan www.ectopic.org.uk.

Waa maxay maareynta filashada?

Ereyga 'maareynta filashada' ayaa sida caadiga ah lagu qeexaa sugitaan feejignaan leh ama dabagal dhow oo ay sameeyaan xirfadlayaasha caafimaad halkii laga heli lahaa daaweyn degdeg ah.

Cilmi-baaristu waxay muujisay, bukaannada leh uurka ektoobiga ee si habboon loo qiimeeyo oo heerka hormoonka uurka (beta hCG) uu hoos u dhacayo, ilaa boqolkiiba 50% uurradan ayaa si dabiici ah ku dhammaan doona mana jiri doonto baahi qalliin ama daawo oo ay tahay in lagu daaweeyo xaaladda.

Goorma ayaa maareynta filashada ugu habboon tahay?

Marka la go'aaminayo in maareynta filashada ay habboon tahay,

dhakhaatiirtu waxay marka hore dib -u -eegi doonaan natiijooyinka baaritaannada dhiigga, sawirada ultrasound-ka waxayna ku sameyn doonaan caafimaadkaaga guud qiimeyn. Maaraynta filashada ayaa loo tixgelin doonaa daaweyn marka:

- Hormoonka uu sameeyo uurku (beta hCG) wuu hooseeyaa
- Caafimaadka guud ayaa u muuqda mid deggan
- Heerarka xanuunka waxaa loo tixgeliyay inay yihiin kuwo la aqbali karo
- Sawirka ultrasound wuxuu muujinayaa uur ektoobiga oo yar oo aan lahayn dhiigbax caloosha ah oo laga welwelo.

Muxuu dhakhtarkaygu u doonayaa inuu sidan iila dhaqmo oo uusan isiin doorashada qalliinka ama daawada?

Dhakhaatiirtu waxay had iyo jeer tixgeliyaan nooca daaweynta ee ugu waxyeellada yar ama ku maareynta meesha ugu horeysa ee ay awoodaan. Caddayn cilmi-baaris ku salaysan ayaa muujisay in bukaannada sida habboon loo soo xulay, saami leh uur ektoobiga oo la caddeeyay ama la tuhunsan yahay in aysan u baahnaan doonin daaweyn oo ay ku xallismi doonto daawasho iyo sugitaan. In kasta oo ay tani keeni karto dareen-xanaaqa iyo sidii qofna uusan waxba qabanayn, haddii uurku keligiis xallismo, ka fogaanshaha qalliinka ama ku daawaynta daawada xooga leh, waxay ka dhigan tahay soo-kabashadaadu

inay dhakhso noqon doonto.

Haddi aan nahay Hay'adda Uurka Ektoobigu waxaan aad u aaminsanahay doorashada bukaanka iyo inaad sidoo kale awood u leedahay inaad dooratid daaweyn halkii aad ka daawan lahayd oo aad sugi lahayd haddii aadan dareensanayn in doorashadani dareen ahaan kugu habboonayn.

Sidee la ii kormeeri doonaa?

Dhakhaatiirtu waxay u baadhi doonaan dhiiggaaga si isdaba joog ah si loo hubiyo in heerarka hCG -gu hoos u dhacayaan, badiyaa laba jeer toddobaadka ugu horreeya ka dibna hal goor toddobaadki wixii ka dambeeya ilaa heerku hoos uga dhaco 5 <mIU/mL. Caadi ahaan ma aha lagama maarmaan in la sameeyo baaritaan kale oo ultrasound ah haddii aadan la imaan calaamado kale, markaas oo ay dhakhaatiirtaadu sameyn doonaan qiimeyn.

Mudo intee le'eg ayay tahay in isbitaalku i kormeero?

Muddada aad u baahan tahay inaad sii joogto isbitaalka si aad u hesho baaritaanno isdaba jooga waxay ku xirnaan doontaa inta ay ku qaadaneysa in heerarka hCG -gaagu hoos uga dhacaan 5 <mIU/mL waqtigaanna aad buu u kala duwanaan karaa. Sida caadiga ah, ilaa inta heerarka hCG -gaagu hoos u dhacayo inta u dhaxaysa baaritaannada dhiigga, dhakhaatiirtaadu waxay sii wadi doonaan inay ku kormeeraan oo ay si filasho ah kugu maareeyaan.

Waxay qaadan kartaa wax u dhexeeya laba toddobaad iyo saddex bilood, si heerarka hCG-gaagu ugu noqdo heer aan uur jirin laakiin, inta badan, heerarka hCG-gu waxay gaaraan xaalad aan uur jirin qiyaastii afar toddobaad gudahood.

Intee in le'eg ayay guul tahay maareynta filashadu?

Cilmi-baaristu waxay muujisay in kiisaska sida habboon loo xushay in ka badan boqolkiiba 50% dadka qaba uurka ektoobigu aanay u baahnaan doonin daaweyn uurkunu iskii u baabi'i doono haddi aan daawano oo iska sugno. Heerarka guusha way kala duwan yihiin in kasta oo daraasaduhu muujinayaan in marwalba oo heerka hCG beta uu hooseeyo, ay sare u sii kacdo fursadda uurka ektoobigu uu iskiis u baaba'o.

Sideen ku ogaanayaa haddii ay dhibaato jirto oo aan u baahanahay in si kale la ii daaweeyo?

Dhakhaatiirtaadu waxay awoodi doonaan inay kuu sheegaan haddii uurkaaga ektoobigu uusan baabi'in, maadaama tan lagu ogaan doono natiijooyinka baaritaanka hCG-gaaga caadiga ah. Haddii ay sidaas tahay, waxay kuu soo jeedin doonaan qaabab kale oo daaweyn ah. Astaamaha uurka ektoobiga oo sii xumaanaya, oo ay ka mid yihiin xanuun sii xumaanaya ama sii kordhaya; dhiigbaxa ka socda xubinta taranka; neefta oo ku qabata; suuxdin; iyo xanuun ka haya caarada garabka iyo kuwa kale, ayaa laga yaabaa inay noqoto mid la dareemo.

Haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadahan waxaad u baahan doontaa in dib lagu qiimeeyo. Isbitaalkaagu wuxuu ku siin doonaa lambar aad kala soo xiriiri karto si aad talo caafimaad u hesho haddii aad dareento in wax is-beddelayaan ama lagaa doonayo inaad timaado waaxda Shilka iyo Gurmadka (A&E). Haddii aan lagu sheegin waxa ay tahay in aad samayso oo aad u baahan tahay inaad qof la hadasho, wac waaxda isbitaalka ee ku daaweyneysa ama adeegga NHS 111 adigoo garaacaya 111.

Waa maxay halista ka dhalan karta in sidaan wax loo maareeyo?

Khatarta ugu weyn ee la xiriirta maareynta filashada ayaa ah in unugyada uurka ektoobigu ay sii kala qaybsami karaan, taas oo keeni karta inay weli u baahan tahay daaweyn caafimaad ama qalliin ka dib markii wakhti la wado maareyn filasho. Qiyaastii boqolkiiba 25% haweenka si filasho ah loo maareeyo ayaa hore ugu baahda daaweyn caafimaad ama qalliin. Dhakhaatiirtu waxay sheegi karaan haddii unugyada gaarka ah ee uurka ee soo saara hormoonka hCG ay weli wadaan in ay sii qeybsamaan sababtoo ah waxa lagu gartaa heerka hCG-ga ayaa kor u sii kacaya oo aan hoos u soo dhicin.

Marmarka qaarkood uurka ektoobigu wuu dillaaci karaa inkastoo heerarka hCG-gu hooseeyaan. Haddii aad ka welwelsan tahay heerka xanuunkaaga ama aad yeelato wax calaamado

ah uur ektoobiga oo sii xumaanaya sida kor ku xusan, fadlan la xiriir isbitaalkaaga.

Maxaan samayn karaa si aan u caawiyo maareynta noocan ahi inay ii shaqeeysa?

Waxaa muhiim ah inaad sameyn jimicsi culus ama aadan qaadin culeysyo culus inta heerarka hCG ay hoos u dhacayaan. Waa inaad ka fogaataa galmo ilaa hCG-gaagu ku noqdo heerarka marka aan uur jirin.

Jooji qaadashada daawooyinka folic acid oo iska ilaali fitamiinada kale iyo/ ama macdanta dheeraadka ah ilaa heerarka hCG-gu ay xaqiijinayaan in uurkii ektoobigu dhammaaday. Waxaa muhiim ah in aad si tartiib ah wax u qaadata dhawrka maalmood ee ugu horreeya ka dib baaritaankaaga ilaa laga xaqiijin karo in heerarka hCG ay iskood u dhacayaan.

Dareenkaaga

In lagaa daaweeyo uurka ektoobigu waxay noqon kartaa waayo-aragnimo walaac iyo cabsi leh. Ka sokow culeyska jireed ee daaweynta, waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad si dareen leh iskaga dhaadhiciso wixii dhacay. Way adkaan kartaa in aad fahanto oo dareenku si fiican u muuqdo. Dadku waxay inta badan dareemaan dareeno kala duwan oo isku qasan taasina waa mid la fahmi karo oo caadi ah. Sii naftaada waqti iyo meel aad ku soo kaban karto jidh ahaan, maskax ahaan iyo dareen ahaanba. Waxaa muhiim ah in la xusuusto in uurka ektoobigu uusan